

PL507 (Rev 3)

Isbedello fasaxa xaamilada

Qoraal-kooban oo Aasaas ah



Dowladda waxaa ka go'an inay caawiso waalidiinta shaqeeya. **Isbedelada xaqa fasaxa xaamilada wuxuu u faa'iideynayaa dumarka kuwaasoo asbuuca filashada ilmaha (Expected Week of Childbirth - EWC) uu bilaabanaayo 6-da Abriil ama wixii ka dambeeya ee sannadka 2003.**

Isla markaas, Dowladdu waxay soo saareysaa xuquuqyo lagu bixinaayo fasaxyo mas'uuliyad ilmo korsasho (adoption) iyo aabanimo, iyo xaqa ay waalidka ilmaha dhalinta yar ku codsan karaan shaqo la bedbeli karo. Xuquuqyadan, oo ay la socdaan xuquuqyada jira ee fasax waalidka iyo waqti bixida ee loogu talo galay ku-tiirsanayaasha, waxay siinayaan waalidka fursado badan oo aan hore u jirin si laysugu miisaamo nololsha qoyska iyo shaqada iyadoo islamarkaana lala soconaayo buuxinta, iyo waxtarna loo yeelanayo, shaqo waxqabad fiicni leh.

Buugyarahan wuxuu bixinaayaa oo keliya warbixin aasaas ah oo ah isbedelada furaha ah ee fasaxa xaamilada - xuquuqyo quseeya xaamilada oo fara badan iyo waajibaadyo waxay ahaanayaan kuwo aan isbedelin, ayna ku jiraan xaqa u bixida daryeelka caafimaadka dumarka uurka leh, mudada labada asbuuc ah ee fasaxa xaamilada qasabka ah dhalimada kadib, caafimaadka xaamilada iyo siimaha amniga ruqsada, iyo xaqa ka ilaalinta daaweynta dhibaataada leh iyadoo la eegaayo xaamilonimada. Buugyarahan iskuma dayi doono inuu fasiro wararka balbalaaran ee isbedeladan ku saabsan iyo inaan loo qaadan inuu yahay buugyarahan bayaan awood maamul oo sharci ah.

Qoraalkii ugu dambeeyey ee buugyarahan waxaa laga helayaa shabakada internetka cinwaankuna waa www.dti.gov.uk/matleafr.htm. Hage sharaxaad fiican ka bixinaaya xuquuqyada cusub iyo kuwii horeba ayaa lagu qoray qoraalka lagu magacaabo *Maternity rights* (PL958), kaasoo laga helaaya cinwaanka shabakadan internetka oo ah www.dti.gov.uk/maternity.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah)

Wixii Warbixin dheeraad ah ee mowduucyada xiriirada shaqada eeg cinwaanka shabakadan www.dti.gov.uk/er.

Febraayo 2003

Isbedello fasaxa xaamilada

Dumarka kuwa ilmahoodu uu dhalanaayo **6-da Abriil 2003** ama kaddib, iyo dadka ay u shaqeeyaan, waxay ka faa'iidi doonaan dib-u-eegista, xuquuqaha la fududeeyey ee fasaxa xaamilada.

Taariikho Bilaabis

Dumarka kuu asbuuca filashada ilmaha (Expected Week of Childbirth - EWC) u bilaabanayo 6-da Abriil ama wixii ka dambeeya ee sannadka 2003 waxay ka faa'idayaan siismooyinka fasaxa cusub ee xaamilada (the new maternity leave provisions).

Dumarka EWC-goodu uu bilaabanaayo 6-da Abriil ama wixii ka dambeeya ee sannadka 2003 waxay ka faa'idayaan xuquuqaha fasaxa cusub xataa haddii ilmahoodu dhashay ka hor xilligii la filaayay.

Isbedellada siismooyin fasaxa xaamilada ma ay soo codsan karaan dumarka kuwaasoo EWC-goodu yahay wixii ka horreeyey 6-da Abriil 2003, xataa haddii ilmahoodu dhashay kaddib waqtigii la filayay 6-da Abriil 2003 ama kaddib.

Mudada fasax xaamilada

Murdada fasaxa caadiga ee xaamilada waa la kordhiyey iyo iyadoo shaqaalaha uurka leh xaq loo siiyey 26 asbuuc oo ah **fasax xaamilonimo caadi ah**, iyadoon la eegeyn inta ay u soo shaqeeyeen loo-shaqeeyahooda.

Fasax xaamilonimo caadi ah sida badan qofka mushaarkiisa waa la siiyaa.

Dumarka kuwaasoo la dhameystay adeeg 26 asbuuc ah oo is dabajoog ah loo-shaqeeyahooda billowga asbuuca 14-aad ka hor EWC-gooda waxay awoodaan inay qaataan **fasax xaamilonimo dheeraad ah**. Fasax xaamilonimo dheeraad ah wuxuu isla markiiba ku xigaa fasax xaamilonimo caadi ah wuxuuna soconayaa 26 asbuuc oo dheeri ah.

Fasax xaamilonimo dheeraad ah sida badan mushaar lama bixiyo in kastoo qof dumar ahi laga yaabo inay yeelato xuquuq heshiis la galay oo mushaar bixin ah mudadeeda ay ku jirto fasaxa xaamilonimo dheeraadka ah.

Ogeysiin niyeysi in la qaato fasax xaamilo

Shaqaale uur leh waa in uu ogeysiiyaa loo-shaqeeyaheeda niyeysigeeda inay qaadato fasax xaamilo dhammaadka asbuuca 15-naad ka hor asbuuceeda filashada ilmaha ama EWC-geeda, haddii aysan arrintan caqli ahaan ahayn mid

la sameyn karo. Waa inay u sheegyaa loo-shaqeetaheeda –

- inay uur leedahay
- asbuuca ilmaheeda la filaayo inuu dhasho
- goorta ay dooneyso in fasaxeeda xaamilonimo uu bilowdo

Qof dumar ah way bedeli kartaa maskaxdeeda marka la eego goorta ay dooneyso inuu bilowdo fasaxeeda laakiin waa inay la socod siisaa loo-shaqeeyaheeda ugu yaraan 28 maalmood ka hor intaan fasax la gelin (haddii aysan arrintan caqli ahaan ahayn mid la sameyn karo).

Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga doonayaa inay ka warceliyaan ogeysiin qof dumar ah ee qorshayaasha fasaxeeda muddo u dhaxeysa 28 maalmood haddii aysan qofka dumarka ahi wax isbedel ah ku sameyn taariikhda ay qaadaneysa fasaxa, arrintaaso noqoneysa in loo-shaqeeyuhu uga warceliyo muddo 28 maalmood gudahood ah ee waqtiga uu billaabanaayo fasaxa xaamilonimo. Loo-shaqeeye waa inuu warqad u qoraa shaqaalihisa, muujinayana taariikhda taasoo uu ka filayo inay ku soo laabato si ay u shaqeyso haddii ay qaadato xaqeeda buuxa ee fasax xaamilonimo. Moodo warqad loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha oo la isticmaali karo (hadday rabaan inay sidaas sameeyaan) ayaa laga helaa gudaha buugyaraha lagu magacaabo *Maternity rights* (PL 958) kaasoo laga heli karo shabakada cinwaanka internetka www.dti.gov.uk/er/maternity.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiritaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah).

Ma jiro wax isbedela oo ah sida ugu horeysa ee qof dumar ah u awoodo inuu billaabo fasaxa xaamilonimada - taariikhda ugu horreysa waxay sii noqoneysaa billowga asbuuca 11-naad ka hor dhalasha ilmaheeda.

Ku-noqosho in la shaqeeyo kadib fasax xaamilonimo

Ma sii jireyso siismo la siinaayo loo-shaqeeye inuu warqad u qoro qof dumar ah ka hor dhammaadka waqtiga fasaxa xaamilonimo caadi ah si uu u weydiiyo taariikhda uu ilmaheedu dhashay iyo haddii ay niyeysaneysa soo noqosho kadib waqtiga fasax xaamilonimo dheeraad ah. Tan macnaheedu waa in qof dumar ah oo niyeysaneysa ku noqosho shaqeyn dhammaadka qaadashada xaqeeda buuxa ee fasax xaamilonimo inaan looga baahnayn inay u dhiibto wax ogeysiin dheeraad ah loo-shaqeeyaheeda.

Shaqeeye taasoo rabta inay dib ugu noqoto inay shaqeyso **ka hor** dhammaadka fasaxeeda xaamilonimo waxay u baahan tahay inay siiso loo-shaqeeyaheeda ogeysiin 28 maalmood ah ee taarriikhda ay dooneyso inay dib ugu noqoto shaqeyn.

Jirro dhacday

Fasaxa xaamilonimo ee qof dumar ah wuxuu iska billaabanayaa haddii ay qofkaasi uga maqnaato shaqada xanuun la xiriira uurka muddo 4 asbuuc dhan ka hor bilowga EWC-geeda, iyadoo aan la eegeyn goorta ay sheegtay inay xaqiiqdii dooneyso inuu bilowdo fasaxeeda xaamilonimo..

Isbedello Kale

Xeerka Lacag-bixin Xaamilo iyo Gunno Xaamilo

Waaxda Shaqada iyo Howlgabka waxay ku sameyneysaa isbedello Xeerka Lacag-bixin Xaamilo (SMP) iyo Gunno Xaamilo (MA). Midda ugu muhiimsan isbedelladan kordhi dhererka ee waqtiga ay dabooleyso SMP-da iyo kordhi xaddiga lacagta la dhiibo.

Dumarka kuwaasoo xaq u yeeshay SMP ama MA oo EWC-gooduna billaabanayo 6-da Abriil 2003 ama kaddib waxay helayaan SMP ama MA muddo ah 26 asbuuc.

Dumarka kuwaasoo xaq u yeeshay SMP ama MA oo EWC-gooduna billaabanayo 6-da Abriil 2003 ama kaddib laakiin kuwaasoo ilmahii dhala iyagoon si fiican u korin, waxay weli xaq u leeyihiin inay helaan SMP ama MA muddo ah 26 asbuuc.

Laga billaabo 6-da Abriil 2003, heerka saamiyada ee SMP iyo MA way ka kordhayaan saamiga waqtigan oo ah £75 asbuucii waxaana laga dhigay £100 asbuucii (ama 90% celceliska dakhliga ay kasbato qof dumar ah asbuuc kasta haddii tani ka hooseyso £100 asbuucii). Ma jiro wax isbedel ah oo ku saabsan saamiga waqtigan jira ee dakhli-kasbashada la xiriira ee SMP (90% celceliska dakhli-kastabashada asbuuc kasta) taasoo la adeegsanaaya 6-da asbuuc ee ugu horeysa ee waqtiga lacag bixinta.

Heerka saamiyada cusub waxaa la isticmaaliyaa laga bilaabo 6-da Abriil 2003 iyadoo la siinaayo dhammaan dumarka qaadanaya SMP ama MA xilligaas iyadoo aan la eegeyn goorta uu dhalanayo ilmahooda, ama haddii ay u qalmaan in loo aqoonsado waqtiga lacag dhiibista la-kordhiyey ee cusub (the new extended pay period). Heerka saamiga hadda jira ee £75 waxaa la isticmaalayaa illaa 5-ta Abriil 2003.

Markii isbedellada si buuxda loo meel dhigo, dumarku waxay ka helayaan :

- SMP loo-shaqeeyahooda taasoo u dhiganta 90% oo ah dakhligooda ay kasbadeen muddo 6 asbuuc ah, oo ay soo raacayso 20 asbuuc oo la siinayo £100 (ama 90% oo ah dakhliyo la kasbaday muddada buuxda ee dhan 26 asbuuc haddii tani ka yar tahay £100 asbuucii).

Ama

- MA oo ay ka helayaan Xarunta shaqo Bixinta (Jobcentre Plus) ee xaafadooda/xafiiska badbaadada bulshada (social security office) taasoo dhan £100 asbuucii muddo dhan 26 asbuuc (ama 90% oo ah dakhliyo la kasbaday muddada buuxda ee dhan 26 asbuuc haddii tani ka yar tahay £100 asbuucii).

Sharaxaadyo buuxa ee nadaamyo SMP iyo MA ah oo dib loo daabacay ayaa laga heli karaa buugyaraha NI17A (daabacaadda Oktoobar 2002) kaasoo laga helayo Xarunta shaqo Bixinta (Jobcentre Plus) ee xaafadaada/badbaadada bulshada (social security office). Sharaxaadyo ayaa sidoo kale laga helaa Waaxda Shaqada iyo Howlgabka shabakada internetka cinwaanka ah: www.dwp.gov.uk/lifeevent/famchild/fc_expecting_a_baby.htm

Sharaxaadyo buuxa ee nadaamyo SMP iyo MA ee hadda jira ayaa laga heli karaa buugyaraha NI17A (daabacaadda Abriil 2001). Sharaxaadyo ayaa laga helaa isla cinwaanka shabakada interneetka ee Waaxda Shaqada iyo Howlgabka.

Warar dheeraad ah oo ku saabsan nadaamka SMP ee loogu talo galay loo-shaqeeyayaasha ayaa si dheeri ah looga helaa buugga caawinista (E15 Pay and time off work for parents) ee qaybta Dakhliga-Canshuuraha Berriga (Inland Revenue) (nuqullo ayaa laga helaa wicista telefoonka 08457 646 646). Wixii kaalmo dheeraada, loo-shaqeeyayaasha waxaa suurogala inay soo wacaan khadka-caawinista loo-shaqeeyayaasha oo ah 0845 713 3143.

Dib uhelid loo-shaqeeyayaal biximo-lacago (Employers' recovery of payments)

Diyaargareymaha iminka jira ee loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha si ay dib ugu helaan lacagihii ay ku bixiyeen Xeerka Lacag-bixin Xaamilo (SMP) weli ay socdaan - loo-shaqeeyayaasha waxay awoodaan inay u dacwoodaan dib ugu soo celinta 92% lacago biximihii ay sameeyeen, kuwa iyagu xaq u leh gargaar yar ee loo-shaqeeyayaal (small employers' relief) waxay awoodaan inay u dacwoodaan 100% oo lagu daray cadad dheeriya oo ah xaq-siin qaybtii loo-shaqeeyaha ee tabaruca Caymiska Qaranka ee lagu bixiyey SMP.

Waxaa intaa lagu darayaa, marka la eego diyaargareymaha cusub, loo-shaqeeyayaasha kuwaasoo u baahan inay karaan in loo soo hormariyo lacag ugu deeqida si ay u bixiyaan lacagaha SMP-da lacagtaasoo ka imanaysa waaxda Dakhliga-canshuuraha Berriga (Inland Revenue).

Xuquuqaha Saaxiibnimo Kale ee Qoys

Xaqa Codsashada shaqeyn la badbadali karo

Xaq loogu talo galay waalid haya ilmo da' yar, ama naafo ah, oo ay ku codsanayaan shaqo la badbadali karo ayaa la soo bandhigay. Laga bilaabo 6-da Abriil 2003 shaqeeyayaasha xaqa u leh kuwaasoo ah waalidiin da'da carruurtoodu ka hooseyso lix sano, ama haya caruur naafo ah oo jira da' ka hooseysa sideed sano, waxay heli doonaan xaqa ay ku dalbanayaan shaqeyn la badbadali karo. Loo-shaqeeyahoodu wuxuu haysan doonaan waajib ah inuu si aan dhayalsi ahayn uga fekero codsiyada noocaan oo kale ah.

Buugyare bixinaaya warbixin aasaas ah oo ku saabsan *Shaqayn la badbadali karo -xaqa aad u leedahay inaad codsato (PL516) (Flexible working - the right to apply (PL516)* ayaa laga helaa cinwaankan internetka oo ah www.dti.gov.uk/er/individual/flexible-pl516.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah).

Xaq fasax aabenimo mushaarkana la bixiyey

Xaq fasax waalid iyo lacag bixin ayaa la soo bandhigay. Shaqeeyayaasha xaqa u leh waxay qaadan karaan illaa laba asbuuc fasax ah lacagtana la siinaayo si ay daryeelaan ilmahooda cusub ee dhashay iyo inay taageeraan hooyada. Xaqa waxaa helaya shaqeeyayaasha kuwaasoo ilmahoodu la filaayo inuu dhasho, ama ay dhasheen, 6-da Abriil 2003 ama kadib.

Buugyare bixinaaya warbixin aasaas ah oo ku saabsan *Fasax aabenimo iyo lacag bixin (PL514)(Paternity leave and pay (PL514)* iyo sharaxaadyo hagitaan ee ah *Aabayaasha Shaqeeya - xuquuqo fasax iyo lacag bixin (Working fathers - rights to leave and pay (PL517))* ayaa laga helaa cinwaankan internetka oo ah www.dti.gov.uk/er/paternity.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah).

Xuquuqaha fasaxa mushaarka la bixiyey ee waalidiinta ilmo mas'uul ka ah

Xaq fasax ilmo mas'uul ka noqosho iyo lacag bixin ayaa la soo bandhigay. Xaqa waxaa helaya shakhsiyaadka kuwaasoo qaaday mas'uuliyad ilmo, ama mid ka mida laba qof oo wada nool oo labada qof ee wada nool ay si wadaag ah mas'uul uga noqdeen ilmo. Xaqa fasax aabenimo iyo lacag bixin ee loogu talo galay xubinta kale ee dadka wada nool, ama lammaanaha qofka mas'uuliyada ilmaha qaaday, ayaa sidoo kale la soo bandhigay. Shaqeeyayaasha kuwaasoo carruurtoodu iyaga ku meeleysan yihiin 6-da Abriil 2003 ama kaddib waxay ka faa'iidaya xaqahooda fasax aabenimo iyo mas'uuliyad ilmo iyo lacag bixin.

Buugyare kaa siinaaya akhbaar aasaasi ah *Waalid mas'uuliyad ilmo qaaday - xuquuqaha fasax iyo lacag bixin (Adoptive parents - rights to leave and pay (URN 02/1099))* ayaa laga helaa cinwaanka shabakadda oo ah www.dti.gov.uk/er/individual/adopt-pl515.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah).

Xuquuqaha fasax waalidnimo iyo waqti u bixid ku-tiirsanayaal

Shaqeeyayaasha - aabayaal iyo hooyooyin labadaba - kuwaasoo la dhameystay sannad adeegis ah loo-shaqeeyayaashooda, waxay xaq u yeeshen 13 asbuuc (mushaar la'aan ah) fasax waalinimo si ay u daryeelaan ilmahooda. Fasaxa waalidnimo waxaa sida caadiga ah la qaadan karaa ilaa iyo 5 sano laga billaabo taariikhda dhalashada, ama marka la eego xaaladaha mas'uuliyad ilmo shan sano laga billaabo taariikhda meeleynta (ama sannadguurada 18-naad ee dhalashada ilmaha, haddii taasi dhowdahay).

Waalidiinta carruurta naafada ah waxay xaq u leeyihiin 18 asbuuc oo ah fasax waalidnimo (hore waxau u ahayd 13 asbuuc) illaa marka ilmuhu gaaro sannad guurada 18-naad, waase haddii ay haystaan muddo adeega ee loogu qalmo.

Dhammaan shaqeeyayaasha waxay xaq u leeyihiin inay qaataan cadad waqti bixid ah (mushaar la'aan ah) oo macquul ah si ay ula macaamilaan xaalad degdeg ah ama xaalad aan la fileynin oo ku saabsan ku-tiirsane.

Hagitaan buuxa oo ku saabsan *Fasax waalinimo Parental leave (PL509)* ayaa laga helayaa cinwaanka interneetka oo ah www.dti.gov.uk/er/individual/parental.pdf ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI.

Hagitaan ah xaqa qaadashada *Waqti bixid - loogu talagalay ku-tiirsanayaasha (Time off - for dependents (URN 99/1186))* ayaa laga helayaa cinwaankan interneetka oo ah www.dti.gov.uk/er/time_off_deps.htm ama Khadka-dalbashada Daabacaadaha ee DTI (sharaxaadaha la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta ah Warbixin Dheeraad ah).

Akhbaar dheeraad ah

- Shaqeeyayaasha iyo loo-shaqeeyayaasha labadaba way isticmaali karaan bogga hagidda isku dhafan oo ah (www.tiger.gov.uk) si ay u ogaadaan xuquuqaha ku wajahan fasaxa aabenimo iyo hooyonimo iyo lacag bixin.
- Buugyarayaasha hagitaan ee lagu soo sheegay buugyarahan waxaa laga helayaa Khadka-dalbashada Daabacaadaha oo ah 0870 1502 500 ama waxaa laga dalban karaa internetka cinwaanka www.dti.gov.uk/publications
- Loo-shaqeeyayaasha waxay ka heli karaan akhbaarta SMP-ta cinwaanka internetka xafiiska Dakhliga-canshuuraha Berriga (Inland Revenue). Wixii caawino dheeraada, loo-shaqeeyayaasha waa suuro gal inay soo wacaan telefoonka khadka loo-shaqeeyayaasha oo ah 0845 714 3143.
- Talobixin dheeraada oo ku saabsan arrimaha sharuucda shaqada, oo ay kamid tahay xuquuqaha cusub, sidaas si lamid ah isticmaal is hagitaan wanaagsan ayaa laga helaa ACAS cinwaanka interneetkuna waa (www.acas.org.uk) khad telefoon Khadkooda-caawinista Qaranka waa (08457 47 47 47)
- Ganacsatada yaryar waxay iska diiwaangelin karaan cinwaanka interneerka oo ah www.businesslink.org si ay u helaan warqado xusuusin iyo isbedelada u dambeeyey ee ku saabsan isbedello sharciga shaqada. Akhbaar ayaa sidoo kale la helaa ka hadlaaya caawino balaaran nooc kastana leh looguna talo galay ganacsatada yaryar.
- Akhbaar ku saabsan dhammaan qaababka sharci-dejinta shaqada ayaa sida caadiga ah ay bixiyaan xisaabiyayaasha, xarumaha talosiinta wadaniyiinta (Citizen Advice Bureau) ururada loo-shaqeeyayaasha, talobixiyayaasha sharciga (legal advisers), unugyada mushaar hoose (low pay units), urur shaqaale (trade unions) iyo tiro ah hantilayaasha gaarka ah (private sector) iyo ururrada iskaa-wax-u-qabso (voluntary bodies).